*Si looga hortago kaneecada Aedes ee duulaanka ah, biyaha taagan/fadhiya ka saar gudaha iyo dibadda guriga*

LA DAGAALLAMA Qaniinyada!

# Gurigaaga ka ilaali Kaneecada *Aedes*

## 1 Kahortagga taranka/tarmida kaneecada

### Daadi/Qub Biyaha Taagan

- Kaneecadu waxay ukumaheeda ku riddaa biyo taagan; dirxigu waxay ku noolaan karaan xitaa weelasha yaryar



***Gudaha guryaha***

- Bedel biyaha ku jira dheryaha, saxuunta, dheryaha ubaxa, iyo alaabta xayawaanka rabaayada ah wax lagu siiyo.
- Biyaha bannaanka ha uga tagin in ka badan ***1 toddobaad***




***Banaanka***



- Daadi biyaha ku urura alaabta lagu ciyaaro, taayirada, weelasha wax lagu keydiyo, iyo baaldiyada
- Dabool weelasha qashin-qubka iyo gaari-gacmeedyada
- Bedelaad ku sameey biyaha ilaha iyo barkadaha. Haddii aan la isticmaalin, ku dar sunta kaneecada
- Biyaha ka daadi dheriyada dhirta iyo saxuunta. Daadi biyaha dhirta boromeliad-ka



- Ka saar biyaha ku ururşan barxadaha, tarbaalada, ama doomaha/baabuurta kaydsan
- Fur masharaafyada oo hagaaji tubooyinka qubaya iyo qalabyada rusheynta
- Shaashado/dhalooyin u sameey duleelada foostooyinka roobka kana ilaali in ay biyuhu ku urursamaan dushooda ama agagaarka foostada roobka





## 2 Naftaada ilaali

- Hagaaji daloolada muraayadaha albaabka iyo daaqadaha
- Xiro shaar gacmo-dheer, surwaal, sharabaadyo iyo kabo markaad dibadda joogtid, xataa maalinta



- Maqaarka iyo/ama dharka marso dawooyinka cayayaanka sida DEET, picaridin, saliidda liinta eucalyptus, ama IR3535 (had iyo jeer u isticmaal sida lagu caddeeyey calaamadda badeecada)

## 3 Noqo Xog-ogaal!

### Kaneecada *Aedes*

- Waxay leeyihiin midab madow ah oo leh xariijimo cadcad
- Waxay dadka qaniini doontaa maalinta
- Wax ugxaan ku dhashaa gudaha iyo dibaddaba guriga
- Waxay faafin kartaa cudurro ay ka mid yihiin Zika, dengue, chikungunya, qandhada jaalaha ah, iyo fayraska West Nile
- Waxay ukumaha ku ridaan biyaha yar
- Ukuntu waxay qaangaar ku noqon kartaa in ka yar ***1 toddobaad!***

Ka hubi SDFightTheBite.com wixii macluumaad dheeraad ah

**Xiriir**

**(858) 694-2888 • vector@sdcounty.ca.gov**
**www.SDFightTheBite.com**

# Kaneecada *Aedes*

Kaneecada *Aedes* ee duulaanka ah asal ahaan kama soo bilaaban California. Waxay leeyihiin midab madaw ah oo leh xariijimo cadcad ah waxayna qaniinaan dadka inta lagu jiro **maalintii**. Waxay ugxaantooda ku dhalaan ilaha biyaha ee guryaha, ama xitaa gudaha guriga. Waxay gudbin karaan cudurada Zika, dengue, chikungunya, qandhada jaalaha ah, iyo fayraska West Nile. Ku biir dagaalka lagula jiro kaneecada adiga oo biyaha taagan ka saaraya gudaha iyo hareeraha gurigaaga.

## Ka hortag tarmida kaneecada



## Daadi/Qub Biyaha Taagan



KA HORTAG TARMIDA KANEECADA




## Ka hortag tarmida kaneecada

•••

## Naftaada ilaali

•••

## Noqo Xog-ogaal

**Wixii macluumaad dheeraad ah, nagu soo booqo khadka SDFightTheBite.com**

GOBOLKA SAN DIEGO
Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka
**Barnaamijka Xakamaynta Fektarka**
5570 Overland Avenue, Suite 102
San Diego, CA 92123
(858) 694-2888

Sawirada Daboolka iyo Lahaanshaha Xaquuqda Sawirka James Gathany, *Xarunta Xakamaynta Cudurada*

# Kaneecada *Aedes* ee Duulaanka ah

***Kaneecada Xumadda Jaallaha ah***




***Shabeel Aasiyaan ah Kaneeco***




GOBOLKA SAN DIEGO
Waaxda Caafimaadka iyo Tayada Deegaanka
**Barnaamijka Xakamaynta Fektarada**